Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH
# الجريدة الرسمية
# OFFICIAL BULLETIN
## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 9aad** **FAAFIN SANADLE** **Muqdisho** **2022**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2022**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

# SANADKA

# 2022

**XEER MADAXWEYNE LR. 46** Taariikh: 11/10/2022

# MAGACAABIS NOOTAAYO

## MADAXWAYNAHA J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

**MARKUU ARKAY**: Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962 kuna saabsan howlaha Nootaayo

**MARKUU ARKAY**: Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha

**MARKUU TIXGELIYAY**: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, Warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/0017/2022** ku taariikheysan: **09/10/2022** kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo

***Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:***

**Qodobka 1aad**

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaa **Prof. Avv. Cali Abuukar Xaayow (Cali Marduuf)** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo

**Qodobka 2aad**

Waxa uu **Prof. Avv. Cali Abuukar Xaayow (Cali Marduuf)** ka howlgelayaa Gobolka Benaadir gaar ahaan magaalada Muqdisho

**Qodobka 3aad**

Waxa uu Xeerkan Dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha JFS saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 11/10/2022**

Madaxweynaha J.F.S
Mudane **Xasan Sheekh Maxamuud**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-49-22
TAARIIKH: 19-10-2022
SAXIIXA:
HANTIDHAWRAHA GUUD
Md.Maxamed Maxamuud Call